



# XIRFADAHA GORGORTANKA EE WAALIDIINTA

Sida Loo Helo Waxbarashada Gaarka  
ah ee Ilmahaaga Naafada ah u Baahan yahay

AGOOSTO 2014



**Disability  
Rights** OHIO

Waxaan leenahay xaqa sharciga ah.



## JADWALKA TUSMADA

Horudhac	3
U Diyaargarow inaad Gorgortanto	4
Yaa Hayo Macluumaadka Aad u Baahan tahay	5
Si Waxtar Leh ula Xiriir	6
Waxyaabaha la sameeyn karo iyo waxyaabaha reeban ee Xiriirka Qoran	7
Ka Hel Natiijooyin Wanaagsan Kulannada	8
Garo Marka Kooxdaada ay Dhibaato Ku Jirto	12
Garo Waxa ka Dhigo in Kooxdaadu Shaqeeeyso	14
Garo Marka Tallaabo Rasmi ah oo Dheeraad ah loo Baahan yahay	16



## HORUDHAC

Buug-yarahan wuxuu ka kooban yahay soojeedino kaa caawinayo gorgortanka si aad ugu hesho adeegyada ku habboon ilmahaaga. Buug-yarahan waxaa loo qoray waalidiinta haysta carruurta naafada ah si ay uga caawiyaan inay ku guuleystaan geedi-socodka kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (Individualized Education Program, IEP). Talooyinka waxay sidoo kale si fiican uga waxtari karaan dhammaan xaaladaha marka kooxaha ay masuul ka yihiin go'aamada ku saabsan adeegyada ilmahaaga.

Xeerka **Horumarinta Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada (Individuals with Disabilities Education Improvement Act, IDEA)** waa sharci federaal ah oo uga baahan dugsiyadu inay siiyaan adeegyo carruurta naafada ah. Sharcigani wuxuu uga baahan yahay dugsiyadu inay ku siiyaan **Waxbarashada Dadweynaha Bilaashka ah ee Habboon (Free and Appropriate Public Education, FAPE)** ilmahaaga **Bay'adda ugu Xaddidaad Yar (Least Restrictive Environment, LRE)**. Koox ka kooban shakhsiyaad aqoon u leh ilmahaaga iyo waxbarashada gaarka ah ayaa looga baahan yahay inay go'aamiyaan u-qalmitaanka adeegyada iyo adeegyada uu ilmahaaga u baahan yahay. Waxaad tahay xubin muhiim ah oo ka mid ah kooxdaas.

Haddii la ogaado ilmahaaga uqalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah, kooxda waa in ay qoraan qorshe loo yaqaan **Barnaamijka Waxbarashada Gaar Ahaaneed (IEP)**. Xubnaha kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) waa inay wadashaqeeyaan si heshiis looga gaaro waxa Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) bixin doonto. Geedi-socodka kooxda ayaa u oggolaanaya xubnaha gaarka ah in ay qabaan fikrado kala duwan oo ku saabsan waxa ku haboon ilmahaaga. Sidoo kale waa mas'uuliyadda kooxda in ay gaarto heshiis inkastoo ay jiraan kala duwanaanshahaas.

Isticmaalka talooyinka ku yaal buug-yarahan ayaa kaa caawin kara xalinta dhibaatooyinka kaala dahxeeyo dugsigga degmadaada si dhaqso ah oo aan rasmi ahayn. Arrimaha adag waxay u baahan karaan wakhti iyo dadaal badan si loo xalliyo waxaana laga yaabo inay u baahdaan isticmaalka dhawr hab oo lagu sharraxay buuggan. Ma jiro wax beddel u ah inaad diyaargarowga. Diyaargarowga si aad ugu dooddo sida ugu fiican mawqifkaaga ayaa kaa caawin doonta inaad u hesho natiijo wanaagsan ilmahaaga. Haddii aadan xalin karin dhibaataadaada adoo isticmaalaya talooyinka ku qoran buug-yarahan, raadso gargaar.



## **U DIYAARGAROW INAAD GORGORTANTO GARO WAXA AAD U BAAHAN TAHAY IYO QOFKA LA WEYDIIYO**

Talaabada koowaad ee helitaanka adeegyada ilmahaaga waa diyaar u ahaataa inaad sharraxdo waxa aad u rabto ilmahaaga iyo inaad heysato macluumaad taageera codsigaaga. Kadib markaad go'aansato waxa ilmahaagu u baahan yahay, waa inaad si cad ula xiriirtaa qofka ku habboon waxa aad codsaneyso. La xiriirrida qofka ku habboon waa habka ugu dhaqsaha badan, ugu fudud ee lagu xalliyo ama wax looga qabto arrimaha.

### **IAqoonso Dhibaataada iyo Waxa aad rabto**

Faham asalka dhibaataada iyo mawqifka labada dhinac. Go'aanso haddii uu jiro xal sahlan oo lagu xalliyo arrinta ama haddii shaqo dheeraad ah ay lagama maarmaan tahay si loo gaaro xal. Go'aanso haddii ay jiraan wax ka badan hal hab oo lagu xalliyo arrinta oo ay xasuusnow in ay tahay mida ugu sahlan in la hirgaliyo, xal dhammaan xubnaha kooxda taageersan yihiin. Haddii ay jiraan habab badan oo lagu xallin karo arrinta, guud ahaan dugsiga ayaa leh go'aanka ugu dambeeya ee ikhtiyaarka loo isticmaali doono haddiiba ikhtiyaarka ku habboon yahay ilmahaaga. Haddii macallinka iyo shaqaalaha kale ee dugsiga ay kugu raacaan ikhtiyaarka, waxay u badan tahay in si fiican loo hirgelin doono oo uu guul u ahaan doono ilmahaaga.

### **La Xiriir Qofka Saxda ah**

La hadal qofka hayo macluumaadka aad u baahan tahay ama awood u leh inuu sameeyo isbeddelada aad rabto. Haddii uu jiro shakhsi joogo dugsiga oo aad la samaysatay cilaqaad wanaagsan, way ku caawin kartaa inaad kala xiriirto dhibaatooyinka qofkaas marka hore. Iska ilaali inaad la xiriirto dadka aad la leedahay

cilaaqaad xum haddii ay macquul tahay. Isku day inaad xaddido tirada dadka isku dayaya inay xalliyaan cabashadaada. Aqoonso qofka dabagalaya arrimaha oo kugu soo jawaab-celinaya isla markaasna ku heshiia wakhtiga aad xiriiraysaan. Hubi in qof kasto fahmo kaalintiisa iyo masuuliyada ka saaran xallinta arrinta. Waa mid waxtar leh in la qoro dulmar qof waliba saxiixo kaasoo muujinayo cidda samayn doonta waxa iyo goorta la samayn doono. Noqo qof ku dayasho leh oo hubi in aad dhameeyso waxa aad oggolaatay inaad sameeyso.

## Go'aami Qofka Hayo Macluumaadka Aad u Baahan tahay

Tallaabada aadka muhiimka ugu ah guuleysiga gorgortanka aad la leedahay dugsigaaga waa inaad garato xaqiiqooyinka xaaladaada. Fududaanta helitaanka macluumaadka iyo xaqiiqooyinka aad u baahan tahay waxay ku xiran tahay garashada cidda hayso macluumaadkaas. Dadku waxay ka mahadceliyaan fursada ay ku xallinayaan dhibaatooyinka heerka ugu hooseeya suurtoogalka ah. Imisa jeer ayaad maqashay qof leh, "haddii aad ii sheegi lahayd, waan ku faraxsanaan lahaa in aan arrintaasi wax ka qabto." Guud ahaan qofka ula shaqeeynaya ilmahaaga si joogto ah wuxuu hayaa macluumaadka ugu badan oo ku saabsan ilmahaaga. Marar badan, kormeeraha guud wax macluumaad ah kama hayn karo arrimaha maalinlaha ah ee ku saabsan ilmahaaga. Tani waxay sidoo kale la mid ahaan kara maamulaha waxbarashada gaarka ah iyo madaxa dugsiga, haddii aan arrin gaar ah la ogeysiinin.

## YAA HAYO MACLUUMAADKA AAD U BAAHAN TAHAY?

Xirfadlaha Waxbarashada Gaarka ah	Waxa Qofka ay Tahay Inuu Hayo
<b>Macalinka</b>	Wuxuu hayaa macluumaad ku saabsan Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) iyo manhajka guud ee heerka fasalka ilmahaaga iyo sidoo kale jadwalka fasalka iyo bay'adda.
<b>Madaxa Dugsiga</b>	Wuxuu hayaa macluumaad ku saabsan jadwalka dhismaha iyo gaadiidka, helitaanka shaqaalaha (kaaliyayaasha, macalimiinta) iyo mashaariicda dhismayaasha gaarka ah iyo mawduucyada.
<b>Maamulaha Waxbarashada Gaarka ah</b>	Wuxuu hayaa macluumaad ku saabsan dhigaalada degmada ee adeegyada loogu talagalay carruurta naafada ah, haddii adeegyo dheeraad ah la bixin karo, goobta barnaamijyada iyo adeegyada, wuxuuna guud ahaan go'aan ka gaari karaa waxa kormeeraha guud uu doonayo inuu qabto.
<b>Kormeeraha Guud</b>	Wuxuu leeyahay awooda ugu sareeysa ee go'aan qaadashada si wadajir ah iskula gaaraan guddiga dugsiga ee ku saabsan qoondeynta khayraadka iyo goobta adeegga.

# SI WAXTAR LEH ULA XIRIIR SAMEE ISFAHAM WANAAGSAN

Waxaa had iyo jeer wanaagsan in aad ku xalliso arrin kasta heerka ugu hooseeya ee suuragalka ah ee leh habka ugu fudud ee xiriirka la heli karo. Haddii aad u maleyneyso inaad xallin karto arrin adoo la hadlaya macalinka, samee. Haddii aysan shaqeynin, u gudub heerka xiga.

Waa dhaqan wanaagsan inaad dadka weydiiso sida ay doorbidayaan in loo la soo xiriiro. Macallimiinta qaar ayaa raali ka ah inay waalidiinta shaqsi ahaan ugala soo xiriiraan (qorsheysnayn) arrimaha yar yar. Qaar waxay door bidaan telefoonka ama iimaylka, qaar kalena waxay jecel yihiin shir qorsheysan si looga wadahadlo arrimaha. Go'aanso habka aad doorbideyso oo isku day inaad isticmaasho mar kasta oo ay macquul tahay. Sidoo kale waa inaad sheegto waxa aad doorbidayso si loo ogaado xilliga lagula soo xiriiro. Waalidiin badan ayaa la sameeya xasuus-qor ama hannaan xiriir oo joogto ah macalinka si ay ula socdaan waxqabadka maalin/todobaad kasta oo ilmahooda ama dhibaatooyinka soo baxa. Go'aanso haddii macalinku doonayo in habkan loola xiriiro. Haddii ay sidaas tahay, waxaad codsan kartaa in xusuus-qorka xiriirka loogu daro adeeg ahaan Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) ee ilmahaaga. Tani waxay si gaar ah waxtar u leedahay marka ay carruurtu aysan awoodin in ay lala xiriiro ama ay caruurto ku gabaan dhibaatooyin joogto ah fasalka dhexdiisa.

## Xiriirka Gaarka ah

Xiriir wanaagsan aad la yeelato qofka la shaqeynaya ilmahaaga ayaa kahortagi kara dhibaatooyinka badan ee dugsi. La samee isfaham macalinka ilmahaaga ka hor inta aysan dhibaatooyinka soo baxin. Noqo mid la heli karo si aad ugu tabarucdid fasalka oo aad u hesho jawaab-celin joogto ah. Tani waxay kaa caawin doontaa in la abuurto jawi xiriir furan.

Isku day in aad la xalliso dhibaatooyinka macalinka marka hore iyo marka ay soo baxaan. Waxaad codsan kartaa inaad la hadasho macalinka ilmahaaga ama shir waalid/macallin. Waxaad siin kartaa talooyin macalinka ama waxaad bixin kartaa qalab waxtar leh. Macluumaadka waa in loo bixiyaa qaab taxadar leh oo aan soo jeedinayn in macalinku aqoon u lahayn, waana in uusan noqon mid badan oo jahawareeriya macalinka.

La xiriirrida qof shaqsi ahaan waxay kuu ogolaanaysaa inaad fahirato faro-hadalka iyo is-muujiinta qofka waxaana laga yaabaa inay ku siiso aragti feku aadan dareenka qofka ee ku saabsan codsiyadaada, iyo rabitaanka inaad la socoto iyaga.

U gudub heerka xiga haddii aanad la xallin karin arrinta macalinka. Go'aaso cidda ku xigta ee ku caawin karta. Haddii hal qof kaa hor joogsado waxa aad u baahan tahay, u tag qof kale oo kaa caawin kara.

## Xiriirka Telefoonka

Haddii ay kugu habboonayn inaad dugsi tagto si aad ula hadasho macalinka ama shaqaalaha kale, wicitaan telefoon ayaa la samayn karaa si loo xalliyo arrimaha. Waxay kaa caawineysaa inaad weydiiso marka ay ugu wacan tahay inaad wacdo. Xiriirka telefoonka waa in lagu bilaabo wadahadal iyo su'aalo gaaban oo si fudud looga jawaabi karo. Haddii arrintu ay tahay mid aad u adag, xiriir ama kulan fool-ka-fool ah oo looga wadahadlo arrinta ayaa laga yaabaa in loo baahdo.

## TALO GORGORTAN

Xasuus-qoraal ka sameyso xiriir kasta. Qor taariikhda iyo waqtiga, cidda aad la hadashay iyo waxa la yiri.



## Xiriirka Qoran

Waxaa jira laba nooc oo xiriirka qoraalka ah oo aad la yeelan karto dugsigaaga. Kan koowaad waa waqaaqo qoraal ah oo ku saabsan dhammaan wada xiriirka aad la yeelatay dugsiga. Waa inaad haysataa qoraaleeda dhammaan wada-hadallada, wicitaanka telefoonka, kulannada, iyo xiriirada kale ee aad la leedahay dugsiga. Waa mid waxtar leh inaad haysatid xusuus-qor (galka waraaqaha ayaa ku habboon) kaasoo aad ku qori karto taariikhda, waqtiga, nuxurka doodka, iyo magaca qofka. Dhammaan waraaqaha la xiriira waxbarashada ilmahaaga ayaa lagu kaydin karaa isla galka (waxaa ka mid noqon kara Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) ee ilmahaaga, qiimeynada, warbixinada waxqabadka, shaqada fasalka, iwm). Waraaqaha noocan ah waa lagama maarmaan si loo sameeyo diiwaanka dhammaan isdhexgalada lala yeesho dugsiga. Macluumaadkan waxaa laga yaabaa inuu lagama maarmaan u noqdo gorgortan toos ah oo lala yeesho dugsiga.

Nooca labaad ee xiriirka qoraalka ah waa inaad u sheegto dugsiga cabashadaada ku saabsan ilmahaaga ama inaad ka codsato macluumaad ama ficil gaar ah dugsiga. Haddii habab aan rasmi ahayn oo gorgortanka ah lagu guuldareysto, waxaad sii wadi kartaa habab badan oo rasmi ah. Talaabada koowaad ee geedi-socodka waa in loo diro warqad dugsiga iyadoo la dirayo codsi qaas ah oo jadwaleysan loogu talagalay jawaab-celin. Waa inaad u dirtaa warqadda qaab caddayn doona rasiidadeeda (sharciyeysan, warqad diiwaangashan). Waxaad sidoo kale gacanta ku gayn kartaa oo weydiin kartaa qofka nuqulka koowaad sida loo helay. Had iyo jeer ka hayso nuqul dhammaan waraaqaha diiwaannadaada oo waligaa ha siinin nuqulkaaga kaliya ee diiwaanka.

## WAXA LA SAMEEYN KARO IYO WAXYAABAHA REEBAN EE XIRIIRKA QORAN

WAXYAABAHA SAMEYN KARO	WAXYAABAHA REEBAN
<p><b>WADAAG macluumaadka caadiga ah.</b> Tusaale ahaan, waxaad isticmaashaa buug xiriireed oo ka socda dugsiga ilaa guriga oo loo soo celinayo si joogto ah si loo wadaago macluumaadka ku saabsan maalinta ama cabashada jirta ee ilmahaaga.</p>	<p><b>HA WADAAGIN macluumaadka adag</b> ee u baahan sharaxaad weyn iyo cadeyn. Si kastaba ha noqotee, warqad ayaa loo isticmaali karaa si loo codsado kulan looga wada hadlo arrintan adag shakhsi ahaan.</p>
<p><b>U Gudbi codsiyo gaar ah dugsiga</b> ee ku saabsan barnaamijka ilmahaaga ama aad ku diiddayo soo-jeedino gaar ah oo ay degmadu samaysay, gaar ahaan marka ay ku xirantahay waqti go'an quseyso oo aad u baahan tahay inaad qortid marka aad samaysay codsiga.</p>	<p><b>HA isku dayin inaad xalliso dhibaato adag.</b> Warqad ayaa loo isticmaali karaa in lagu sheego dhibaataada sida aad u aragto, laakiin geedisocodka xallinta dhibaataada ee dhabta ah waxaa sida caadiga ah ee ugu fiican loogu qabtaa telefoon ama shakhsi ahaan, iyadoo ku xiran adkaanta.</p>
<p><b>SOO KOOB xiriirkii hore</b> laga bilaabo shirarka ama wicitaanada telefoonka kuwaas oo ballanqaadyo ficil lagu sameeyey.</p>	<p><b>HA u dirin dugsiga nuqulkaaga kaliya ee diiwaanka.</b> U samee nuqul kale xubnaha kooxda.</p>
<p><b>DHEH mahadsanid.</b> Kaar ama qoraal ayaa aad ugu habboon si aad u muujiso mahadnaqaaga iyo taageerada shaqada dugsigu la sameeynayo ilmahaaga.</p>	<p><b>HA u dirin dugsiga warqad aad ku qortay marka aad careysan tahay.</b> Qaado waqti aad ku degto si warqaddaada loogu qoro hab degen oo cad.</p>

# KA HEL NATIJOOYIN WANAAGSAN KULANNADA SAMEE SHAQADAADA GURIGA

Mararka qaar waxay noqoneysaa lagama maarmaan in la codsado kulan si loo xalliyo arrin. Kulannada waxaa lagu codsan karaa wicitaan telefoon, laakiin wicitaanku waa in la raaciyaa warqad xaqiijin ah. Kulan ayaa laga yaabaa inuu lagama maarmaan u noqdo xalinta khilaafka kaas adag oo ku lug leh codsi adeeg oo noqon kara qaali ama waqti ku qaadan karo dugsiga si loo bixiyo.

Waxaa jira talaabooyin qaarkood ay tahay inaad qaado si aad isugu diyaariso geedi-socodka kulanka. Inta aad badanaa diyaar u tahay kulanka, fursada aad kala soo noqon kartid kulanka xalka aad rabto ayaa ka wanaagsan.

## La xiriir khabiir si aad u Raadsato Taageerada Mawqifkaada

Khabiir waa qof waxbarasho gaar ah iyo khibrad u leh arrin gaar ah. Khabarada badanaa waxay haystaan shati ama shahaado ama aqoonsiyo kale si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed. Khabiirada waxaa ku jiri kara, laakiin kuma koobna, dhakhaatiirta, dhakhaatiirta cilmi-nafsiga, barayaasha, daaweeyayaasha hadalka, daaweeyayaasha xirfadaha, iyo daaweeyayaasha jirka.

Lahaanshaha khabiir ama taageerada xirfadeed ee mawqifkaaga ayaa badin doonta fursada natijada guulaysata ee kullannadaada kasta. Inta lagu jiro kulanka, waa inaad tixraacdaa dukumeentiyada khabiirada ama xirfadlayaasha taageera mawqifkaaga.

Haddii ay suurtagal tahay, hayso khabiir ama xirfadle ka qaybgala kulanka. Way sahlan tahay in dugsigu ka dhago adeego dukumeentiga marka loo eego inuu ka dhago adeego gofka fadhiya kulanka.

Waad weydiisan kartaa dugsiga inuu bixiyo kharashka khabiirkan haddii aad codsaneyso qiimeynta madax-bannaan ee waxbarashada (Independent Educational Evaluation, IEE) ilmahaaga. Waad weydiisan kartaa dugsigaaga inuu bixiyo kharashka qiimeynta madax-bannaan ee waxbarashada (IEE) haddii aanad ku qanacsaneyn qiimeynta dugsiga ku sameeyay ilmahaaga.

Dugsigu waa inuu ogolaadaa inuu bixiyo kharashka qiimeynta madax-bannaan ee waxbarashada (IEE) ama codsado dacwad maamuleed xuquuq dhowris si uu u muujiyo in qiimeyntu ay ahayd mid habboon. Haddii aad rabto in aad ka raadsato kharashka qiimeynta madax-bannaan ee waxbarashada (IEE) dugsiga, waxaa ugu wanaagsan inaad heshiis la gaarto dugsigaaga wixii ku saabsan shuruudaha qiimeeyaha, baaritaanada la isticmaali doono, iyo cidda bixinaysa ka hor inta aan la qorsheyneynin qiimeynta madax-bannaan ee waxbarashada (IEE). Waxaad sidoo kale qiimeynta madax-bannaan ee waxbarashada (IEE) ku heli kartaa kharashka adiga kuu gaarka ah wakhti kasta.

Khubaro iyo xirfadlayaal badan ayaa ku mashquulsan oo aan iman karin kulankaada. Iska hubso in qofku ka qaybgeli karo kulanka isagoo isticmaalaya telefoonka shirka. Tani waxay xadeyneysaa xaddiga waqtiga uu qofku u qoondeeyay inuu ku caawiyo. Haddii khabiirkaaga ama xirfadlahaaga kuu caawin karo sidan, hubso inaad qoondeysid wakhti iyo goob loogu talagalay kulanka kaasoo qofka ku haboon oo hubi in uu yaalo taleefanka shirarka goobta shirka. Go'aanso cidda diyaarinaysa telefoonka ka hor kulanka.



## Heerarka Sharciga

Si adeegyada ilmahaaga loogu doodo si wax ku ool ah, waa in aad la socotaa sharciga iyo heerarka ku habboon ee daboolaya arrintaada. Sharciga ugama baahna dugsigaaga inuu siiyo ilmahaaga waxbarashadda ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah ama sare u qaado awoodda waxbarasho ee ilmahaaga gudaha dugsiga. Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) ee ilmahaaga waa inuu siiyaa ilmahaaga waxbarasho bixiso wax ka badan nacfiga ugu yar. Tani waxay badanaa ka dhigan tahay in ilmahaagu ka sameynayo horumar macquul ah xagga hadafyada iyo himilooyinka la isku raacay hal sano.

Ka taxadar inaad u doodo adeegyada ilmahaaga sida sharciga qabo xaq u leeyahay oo aad u haysato khubiir ama taageero xirfadle. Hubso inaad isticmaasho luqad u dhiganta sharciga oo iska ilaali isticmaalka eradada sharaxaya shucuurtaada, sida “Waxaan dareemayaa,” ama “Waxaan rabaa tan.” Bedelkeeda, isticmaal luqadda sida “waa lagama maarmaan in ilmahaagu helo daweyn jireed sababtoo ah...” ama “qiimeynta waxay taageertaa baahida daaweynta xirfadeed ee ilmahaaga sababtoo ah...”

Heerarka sharciga ee loo isticmaalo waxbarashada gaarka ah lama mid aha heerarka loo isticmaalo duruusta kale sida cilmi nafsiga, daawada, iyo daaweynada la xiriira. Iyadoo sabab u tahay heerarka kala duwan, khilaafaad u dhexeeya waalidiinta iyo dugsiga ayaa dhalan kara marka xirfadlayaasha caafimaadka ama caafimaadka maskaxda ay ku taliyaan in adeegyo ilmaha lagu siiyo goobta dugsiga. Adeegyadan waxaa ku jiri kara daaweynta cilminafsiga, la-talinta, daaweynta xirfadeed, daaweynta jireed iyo noocyo kale oo adeegyo ah.

Inta badan xiriirka hore qoys la leeyahay adeegyada waxaa loo maraa dhakhtarkaaga ama xirfadlaha caafimaad/caafimaadka maskaxda kuwaasoo qora adeegga iyagoo ku salaynayo qaabka caafimaadka lagama maarmaanka ah. Qaabkani wuxuu diiradda saari doonaa dhammaan qaybaha waxqabadka iyo horumarinta ilmaha wuxuuna bixiyaa adeegyo ku salaysan qaabka dib u soo kabashada ama xoojinta kartida baxnaaninta. Adeegyadan waxaa loo qori karaa baahiyaha ka sarreeya wixii lagama maarmaanka u ah wax ka qabashada saameynta xun ee naafanimada ilmaha gudaha dugsiga.

Waxbarashada, adeegyada la xiriira ayaa sidoo kale la siiyaa carruurta, laakiin bixinta waxay ku saleysan tahay baahida waxbarasho, taas oo diiradda saareysa xirfadaha iyo waxqabashada lagama maarmaanka u ah ilmaha si uu uga faa'iideysto waxbarashadiisa. Dhammaan xayndaabyada waxqabashada ilmaha looma baahna inay wax ka qabtaan dugsiga. Inta badan, waalidiintu waxay ka filanayaan dugsigu inuu u hoggaansamo talooyinka bixiyeyaasha caafimaadka/caafimaadka maskaxda ee la xiriira xaq u yeelashada, joogtaynta, iyo muddada adeegga. Mararka qaarkood, heerka adeegga uu ku taliyo bixiyaha caafimaadka ayaa ka sarreeya waxa uu dugsigu mas'uul ka yahay inuu bixiyo.

Si aad ugu guulaysato wadhadalka loogu talagalay adeegyada ku habboon ilmahaaga, waa inaad la go'aamisaa xirfadlaha caafimaadka/caafimaadka maskaxda heerka adeegga lagama maarmaanka ah ee goobta dugsiga. Haddii ay suurtoogal tahay, wixii daawo ah ee loo qoray adeegg la xiriira waa in la caddeeyaa in joogteynta iyo muddada adeegga lagula taliyay goobta dugsiga, oo ku saleysan baahida waxbarasho. Haddii aanad go'aansan karin heerka sharciga ee ku haboon xaaladdaada, waa inaad raadsataa caawimaad udoode ama xirfadle kale oo ku siin kara macluumaadkan.

## HEERARKA SHARCIGA EE ADEEGYADA WAXBARASHADA GAARKA AHAANEED

Adeegga	Heerka
<b>Waxbarashada Gaar Ahaaneed</b>	Barida sida gaarka ah loo qaabeeyey oo daboolaya baahiyaha ilmahaaga oo bixiya wax ka badan nacfiga ugu yar ee waxbarashada.
<b>Adeegyada la Xiriira</b>	Adeegyada ilmahaagu u baahan yahay inuu ka faa'iido waxbarashada gaar ahaaneed, sida gaadiidka iyo hadalka/luqadda, daaweynta jireed iyo xirfadeed.
<b>Adeegyada Caafimaadka/ Caafimaadka Maskaxda</b>	Waxa uu ilmahaagu u baahan yahay inuu soo celiyo caafimaadka jireed ama shaqeynta maskaxeed oo uu u gaaro soo kabsashadiisa ugu sareysa ee suurtagalka ah. (Dugsiyada lagama rabo inay bixiyaan heerkan adeegga ah haddii loo baahdo in ay ka faa'iideystaan waxbarashada.)

## U DIYAARGAROWGA KULANKA

### Ka Hor Kulanka

Ka hor kulan kasta, waa inaad sheegtaa dadka awood u leh inay xalliyaan khilaafkaaga aadna ka codsataa inay imaadaan kulanka. Si cad u sheeg arrinta (arrimaha) oo soo ururi xaqiiqooyin badan oo ku saabsan dhibaataada sida ugu macquulsan. Hubso inaad u raadsato taageero khabiir mawqifkaaga.

Si cad ugu sharrax dugsiyada waxa aad u malaynayso in lagu xallin karo cabashadaada. Waxaa laga yaabaa inaad weydiisato inaad dib u eegis lagu sameeyo Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) ee ilmahaaga iyadoo sabab u tahay himilooyinka aan habboneyn, ama waxaad weydiisan kartaa in adeeg lagu daro Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) si wax looga qabto baahiyaha aan la daboolin. Imow kulanka adigoo diyaar la ah hal xal ama in ka badan oo ku saabsan cabashadaada.

Codso ogaysiin qoran oo ka socota dugsiyada oo ku saabsan mawqifkooda ku saabsan arrinta.

Haddii shaqaalaha dugsiyada diidaan inay sameeyaan wax aad ka codsatay inay sameeyaan, ama haddii dugsiyada soojeedinayo in uu sameeyo wax aad diidan tahay, weydii dugsiyada inuu bixiyo ogaysiin qoran oo ku saabsan sababaha tallaabada ama tallaabo la'aanta. Ogeysiiskan, sharcigu farayo, waa in uu si cad u sharaxaa aasaaska tallaabada ama tallaabo la'aanta dugsiyada.

### TALO GORGORTAN

Deganow. Qaado nasasho ka hor intaanad shucuurtaadu kaa tan badin oo aysan dhaawacin hadafka ilmahaaga.

### Shirka

U qaado dulmar ama qoraal diyaarsan kulanka. Dulmarka ama qoraalada ayaa kaa caawin doona inaad xasuusato arrimaha aadna daboolsho dhammaan mawduucyada doodka. Xusuusnow inaad ka hadasho arrimaha jira oo ha ku tiirsanaan qaladaadkii hore. Ku tiirsanaanta khaladaadkii hore waxay joojin kartaa awoodda kooxda ay diirada ku saarayaan xallinta khilaafka jira, waxay lumin kartaa waqti, waxayna abuuri kartaa jawi aan deganeyn.

Isku day inaad ku bilaabin wadasheekeysiga su'aalo haa-ama-maya ah. Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu u baahan yahay taageero dheeraad ee isbeddel, ha bilaabin weydiisashada kaaliye.



Weydii kooxda waxa la sameyn karo si loo siiyo taageero ilmahaaga inta lagu guda jiro isbeddelka hawl ka hawl. Oggolow wadhadalka inuu hor u socdo, oo ay ku jiraan fikrado badan oo ku saabsan xalalka suurtoogalka ah ee ku saabsan cabashadaada. Su'aalaha haa-ama-maya ah waxay xaddidaan fursadaha gaare ahaan marka jawaab-celinta codsigaagu tahay diidmo. Waxaa lagaaga tagay jawaab balse ma ahan xal.

Haddii aad codsaneyso in dugsigu beddelo Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) ee ilmahaaga ama aad in la qoro IEP cusub, waxaad diyaarin kartaa qabyo-qoraalka hadafyadaada, ujeedooyinka, iyo adeegyada si aad u gayso kulanka. Tani waxay u noqon kartaa mid waxtar u leh geeddi-socodka kooxda ku hagaya natiijada aad rabto, waxayna kuu badbaadin kartaa waqtiga kulanka kaasoo sida kale loo isticmaali lahaa qabyo-qoraalka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP). Waa la aqbali karaa in dugsigu la yimaado kulanka qabyo-qoraalka IEP illaa inta ay jirto falanqeyn furan oo ku saabsan qabyo-qoraalka, ka-qaybgalka geedi-socodka IEP ee dhammaan xubnaha kooxda oo ay ku jiraan waalidka, iyo awoodda beddelka iyo wax-ka-bedelidda qabyo-qoraalka haddii ay lagama maarmaan tahay. Xusuusnow inaad leedahay awoodda aad wax kaga beddeli karto qabyo-qoraalka IEP xitaa haddii lagu soo bandhigay qaab qoran.

Dhammaan kullanaada waa in loo qoraa si uun. Go'aanso ka hor kulanka inad cajalad cod ka duubayso kulanka ama inaad wadanayso saaxiib ama udoode taageero ahaan. Haddii duubista cajalad cod u abuuri doonto xaalad aan fiicnayn ka qaybgalayaasha, markaa waxaad dooran kartaa inaad u wadato kulanka saaxiib beddelkeeda. Dadku waxay noqon karaan si kale marka la duubayo sababtoo ah waxay ka baqayaan in cajaladda loo adeegsado waqti dambe.

Hal dariiq oo diiwaan uga sameyn karto kulanka adiga oo duubin waa inaad saaxiib ama udoode ku taageero u soo wadato kulannada. Qofkani wuxuu qoraal ayuu qaadan karaa si aad diirada u saarto arrimaha lagaga hadlayo kulanka. Saaxiibka ama udoodaha wuxuu sidoo kale ka noqon karaa markhaati wadhadala ka dhacayo kulanka wuxuuna ku siin karaa taageero dareen marka aad joogto goob aad uga hadlayso arimaha dareenka la xariira.

Waa caadi inaad qiirto inta lagu jiro kulamadaas. Si kastaba, waa ilmahaaga waxa mawduuca wadhadalka quseeyo waxaadna u rabtaa sida ugu fiican ilmahaaga. Qiirada waxay ka dhigi kartaa xubnaha kooxda raaxo la'aan. Haddii loo baahdo, qaado nasasho si aad isku xakamayso. Dhammaan wadhadalku waa inuu u dhacaa hab edeb leh iyada oo aan qiirto lahayn.

Si kastaba ha noqotee, waa inaad xasuusnaataa in mid sabab leh noqdaan codsiyada adeegyada ilmahaaga. Ka gorgortan waxyaabaha ilmahaaga xaqa u leeyahay sida uu qabo sharciga, oo aad u haysato xogta taageereysa (tus. qiimeynta, talooyinka caafimaadka/nafsiyadeed, qoraalada horumarka) haddii aad rajeyneysid inaad ku guulaysato geedi-socodka.

## **Ka dib Kulanka**

Haddii heshiis lagu gaaro kulanka, hubso inuu jiro dukumeenti qoran oo ku saabsan heshiiska. Haddii heshiisku yahay mid loogu talagalay adeegyada ilmahaaga, hubso in adeegyada lagu qoray Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP). Dukumenti kasta ayaa lagu lifaaqi karaa iyada oo qayb ka ah Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) haddii kooxdu ogolaato in lagu lifaaqto. Hubso wixii lifaaq ah ay ku jiraan saxiixyada xubnaha kooxda iyo taariikhda heshiiska. Haddii aan heshiis buuxa lagu gaarin kulanka, samee taxaalka tallaabooyinka xiga ee la qaadayo iyo cidda ka masuulka ah. Samee jadwal waqtiyeedka dhammaystirka geedi-socodka kulanka. Xusuusnow in arrimaha qaarkood ay qaataan wax ka badan hal kulan si loo xalliyo. Ha saxeexin Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) haddii aadan waafaqsaneyn. Dugsigu ma diidi karo inuu u adeego ilmahaaga sababtoo ah ma aadan saxiixin Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP), haddii uusan ahayn Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) koowaad ee ilmahaaga.

Xusuusnow in aad uga mahadcelisid dadka ka qaybgalkooda geedi-socodka iyo dadaalkooda ku aaddan inay u adeegaan ilmahaaga. Tani waxaa loo sameyn karaa shaqsi ahaan ama iyadoo la adeegsanayo qoraal ama kaar mahadcelin. Qoraalka ama kaarka mahadcelin ayaa muujinaya mahadnaqidaada iyo taageerada shaqada dugsigu la sameeyo ilmahaaga, xitaa marka arrimuhu ay xoogaa kacsan yihiin.

# GARO MARKA KOOXDAADA AY DHIBAATO KU JIRTO IYO WAXA LAGA YEELAYO

Dhibaataada	Xalka
<b>Qofna ma uusan soo qaadin magaca ilmahaaga soddon daqiiqadood.</b>	Xusuusnow in hadafkaagu yahay inaad si guul leh ugu doodo ilmahaaga. Haddii kooxdu qadka ka baxdo, isku day in aad diirada dib ugu soo celiso ilmahaaga adiga oo si gaar ah uga hadlaya baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga. Waxay noqon kartaa mid waxtar leh in la isticmaalo luqadda “kooxda” sida “waxaan u baahanahay inaan go’aan ka gaarno taageerada caawin doonta ilmahaaga,” halkii “waxaan kaaliye u rabaa ilmahaaga.”
<b>Cod duubaha waa shay indho ku dhac leh.</b>	Ku isticmaalka cod duubaha gudaha kulanka waxay abuuri kartaa xiisad waxayna u gudbin kartaa fariin xun xubnaha kale ee kooxda ee aadan ku kalsoonayn. Waxaa jira sababo aan khatar ahayn oo loo duubo kulanka sida xaas aanan ka soo qaybgeli karin kulanka ama waalid leh dhibaatooyin barasho. Haddii aad rabto inaad cod ka duubto kulan, wac dugsiiga oo ha ogaadaan. Waa mid waxtar leh haddii aad u sheegto sababta aad u rabto inaad u duubto kulanka.
<b>Xubnaha kooxda waxay bilaabayaan inay is barbar dhig xun ilmahaaga kula sameeyaan carruurta kale ee dhigata dugsiiga.</b>	Haddii ay tani dhacdo, isku day in aad diiradaada ku soo celiso ilmahaaga. Dhamaan go’aanada waxbarashada gaarka ah waxay ku saleysan yihiin baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga. Haddii qaar ka mid ah xubnaha kooxda ay aaminsanyihiin in ilmahaaga faragalin ku sameeyo barashada ilmaha kale, weydii kooxda in ay ka wada hadlaan fursadaha isticmaalka iyo adeegyada si wax looga qabto cabashada.
<b>Xubnaha kooxda ayaa eegaya saacadahooda.</b>	Haddii xubnaha kooxdu ay eegayaan saacadahooda ma saarayaan diirada arrimaha si loo xalliyo. Waxaa wanaagsan in joojiyo kulanka oo dib loogu dhigo marka qof waliba haysto wakhti ku filan oo uu xooga saari karo xallinta arrimahaaga. Isku day inaad qabato ballanta kulanka soo socdo marka qof waliba uu joogo. Xusuusnow in aysan marwalba suurtagal ahayn in lagu xalliyo arrimahaaga hal kulan. Haddii aad horay u sii ogtahay inaad aad qabto arrimo adag oo la xallin karin, wac dugsiiga oo u sheeg in kulanku dib loo dhigo si loo helo waqti ku filan.
<b>Qof ayaa tixraacay xeerarka ururka.</b>	Inta badan barayaasha waxay xubno ka yihiin ururo. Mararka qaarkood bare ayaa u maleynaya inaad waydiisanayso inuu qabato hawl ama shaqo xadgudub ku ah xeerarka ururkooda. Tani waxay dhici kartaa marka macalinka ama kaaliyaha la weydiisto in uu qabto shaqo aysan qaban sida musqul geynta ama habraacyada fudud ee daryeelka caafimaadka, sida baarista heerka sonkorta dhiigga ee carruurta qabta sonkorowga. Tani waxay sidoo kale dhici kartaa haddii aad weydiisatid shaqaalaha dugsiiga in uu shaqeeyo wakhti aan caadiyan la shaqeynin sida ka hor ama ka dib saacadaha dugsiiga ama xilliga qadada qadada ama haddii aad weydiisato qof shaqaale ah helidda tababar la qabto xilli ka baxsan saacadaha dugsiiga. Tani waxaa sida ugu fiican wax looga qaban karaa ayadoo la xusuusnaado in ilmahaagu xaq u leeyahay adeegyada lagama maarmaanka ah si uu uga faa’iidaysato waxbarashada. Haddii uu baraha diido inuu bixiyo adeegga lagama maarmaanka ah, waa inaad codsataa in dugsiigaagu raadiyo fursado kale oo lagu bixiyo adeegga.



Dhibaataada	Xalka
<p><b>Miisaaniyadda ama lacagta guud ahaan waa la sheegaa.</b></p>	<p>Lacag la'aanta ama dhibaataada dhaqaale weligeed ma aha sabab uu dugsiga ugu diidi karo ilmahaaga adeegga waxbarasho oo lagama maarmaanka ah. Si kastaba ha ahaatee, ma jiro wax ka hor istaagi kara kooxda inay ka raadiyaan ilaha kale maalgelin adeegyo haddii maalgelintaas la heli karo oo waalidku oggolaado inuu isticmaalo. Mararka qaarkood caruurta waxay u baahan yihiin tiknoolijiyada caawinta (sida aalad xiriir) oo qaali ah. In kastoo dugsigu masuul ka yahay xaqiijinta in ilmahaagu haysto aalada caawinta tiknoolajiyada ah, kooxda ayaa ka raadin kara ilaha kale ee maalgelinta aalad sida caymiska Medicaid iyo caymiska gaarka ah. Waalidiinta loogama baahna inay isticmaalaan caymiska gaarka ah ama caymiska Medicaid si ay u maalgaliyaan aalad.</p>
<p><b>Qof ayaa ku dhagan wixi la soo dhaafay, isaga oo ka hadlaya guuldarooyin iyo niyadjab.</b></p>	<p>Tani waa mid ka mid ah khaladaadka ugu wayn ay waalidiinta iyo dugsiyadu sameeyaan taasoo ka hor istaagayso kooxda in ay horumariyaan adeegga ilmaha. Ka hadalka khaladaadkii hore waxay noqon kartaa mid habboon haddii macluumaadka ay waxtar u leeyihiin in laga fogaado qaladaad kale. Si kastaba ha noqotee, kooxdu waa inay diiradda saaran sida ugu macquulsan imminka la joogo iyo waxa la qaban karo si loogu adeego ilmaha maanta.</p>
<p><b>Dad aan la sheegin ayaa yimid kulanka (sida qareenka dugsiga).</b></p>	<p>Inkastoo aysan jirin wax hor istaagaya in tani dhacdo, waxay dadka ku abuuri kartaa deganaan la'aan marka dad aan la fileyn yimaado kulanka. Labada waalid iyo dugsiyadu waa inay iska siiyaan talo cidda imanaysa kulanka. Haddii aad qorsheyneysid inaad u soo wadato doode, khabiir, ama qareenka kulanka, waa inaad la xiriirtaa dugsiga ka hor kulanka si aad ugu sheegto.</p>
<p><b>Goobta kulanka ee looga hadlayo meeleynta waxay la mid tahay meeleynta dugsiga la rabo ilmahaaga.</b></p>	<p>Waxay guud ahaan ku xiran tahay dugsiga halkaasoo kulanka lagu qaban doono. Sida caadiga ah, kulannada waxaa lagu qaban karaa dugsiga halkaasoo ilmuhu hadda dhigto. Haddii uu jiro khilaaf ka dhexeeya adiga iyo dugsiga ee khuseeyo meeleynta dugsiga ee ilmahaaga, weydiiso kulanka in lagu qabto goob dhexdhexaad ah.</p>



## **GARO WAXA KA DHIGO IN KOOXDAADU SHAQEYISO TIXGELI AWOODAHA IYO BAAHIYAHA**

Sida ilmahaaga, xubnaha kooxda waxay leeyihiin shakhsiyad gaar ah, xirfado, iyo heerar waayo-aragnimo oo saameyn ku yeelan karta awoodaada si loogu wada shaqeeyo ilmahaaga. Fahamka kartida iyo xirfadaha shaqsiyaadka la yimaadaan geedi-socodka kooxda ayaa awood kuu siin doona si wax ku ool inaad ula shaqeeyso koox kasta iyo sidoo kale kooxda oo dhan. Awoodaha iyo baahiyaha kooxda waxay saamayn ku yeelan doonaan istiraatiijiyada aad dooratid si aad ugu isticmaasho geedi-socodka.

Haddii aad la shaqeyneyso koox leh xubno si fiican uga wada shaqeeyo natiijada ku habboon ee ilmahaaga, gorgortanka ayaa noqon doonaa shay wax ku ool ah oo lagu gaari karo heshiis. Marka kooxdaada aysan si fiican iskula shaqeynin, farsamooyinka gorgortanka rasmiga oo dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo si loo gaaro heshiis.

### **U Fikirida si Hal-abuur leh iyo Qaadashada Halista**

Waxaad weydiin kartaa kooxda in ay tixgeliyaan fikradaha iyo hababka cusub ee baridda ama barashada. Qaar badan oo naga mid ah waxaa ku adag isbeddelka ama waxa aan la garanayn, kooxaha waxbarashaduna kama reebna. Haddii aad la kulantid koox ay ku adag tahay u fikirida si hal-abuur leh ama isku dayida fikrad cusub, isku day inaad ku taageerto xubnaha kooxda qaababka guusha iyo dhigaalada taageerada. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka iyo dhigaalada

#### **TALO GORGORTAN**

Ku taageer kooxdaada tusaalooyinka halka fikraddaada lagu tijaabiyey ficil ahaan oo lagu guulaysatay.



taageerada Xarumaha Tababarka Waalidka iyo Macluumaadka (Parent Training and Information Centers, PTICs). Internet-ka wuxuu sidoo kale noqon karaa il macluumaad oo wanaagsan. Ka eeg qaybta Dhigaalada liiska ilaha lagugula taliyay.

Waa mid waxtar leh haddii aad bixin karto tusaalaha barnaamij guuleystay ee laga fuliyay dugsi kale, gaar ahaan haddii barnaamijkaasi u dhaw yahay xubnaha kooxdaada si ay u soo booqdaan.

## Aqoonta iyo Fahamka

Kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) way tacliin badan yihiin aasaas ahaan, xubnahana waxay leeyihiin heerar kala duwan oo fahamka iyo aqoonta ilmo, naafonimo, ama arrin gaar ah. Intaa waxaa dheer, qaar ka mid ah xubnaha kooxda ayaa laga yaabaa inay wax badan ka garanayaan geedi-socodka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) qaarna kama garanayaan. Xubnaha qaarkood ayaa laga yaabaa inay hayaan macluumaad gaar ah oo ku saabsan ilmahaaga, halka kuwo kalena ay hayn karaan macluumaad ku saabsan geedi-socodka ama adeegga la codsaday. Mararka qaar kooxdu waxay u baahan tahay in ay raadiso khibrad dheeraad ah maxaa yeelay macluumaadka lagama maarmaanka ah lagama helayo xubnaha kooxda ee jira.

Haddii aad codsato ka qaybgalka shakhsi kale oo leh khibrad khaas ah, waxay noqon doontaa mid aad u guuleysata haddii dhammaan xubnaha kooxdu ay isku raacaan ka qaybgalaha qofkaas geedisocodka. Xusuusnow in dugsi ugu badan tahay in uu dhagaysato talooyinka qofkaas haddii dugsi ixtiraamo aqoonsiyada qofkaas. Haddii qofku fahmo ka haysto geedisocodka waxbarashada iyo heerarka sharciga marka loo geeyo khibrada khaaska ah, waxay si weyn u xoojineysaa aaminsanaanta ay ku qabaan dhammaan xubnaha kooxda.

Xusuusnow in carruurta inta badan ugu dhaqmaan dugsi si ka duwan sida ay ugu dhaqmaan guriga. Carruurta waxay inta badan ku muujiyaan dabeecado iyo xirfado kala duwan labada meelba. Tani waxay u keeni kartaa dhibaatooyin geedi-socodka kooxda marka dugsi iyo adiga aad qabtaan fikrado aad u kala duwan oo ku saabsan waxa ilmahaagu samayn karo. Tusaale ahaan, dugsi wuxuu kugu soo wargelin karaa in ilmahaagu ku soo bandhigay iskuulka dabeecado aadan waligaa ku arag guriga. Ama, waxaad ku wargelin kartaa dugsi in ilmahaagu yaqaano sida wax loo akhriyo, laakiin ilmahaagu weligiis ku muujinin xirfaddan gudaha dugsi. Fikradda dugsi ka qabo heerka xirfadeed ee ilmahaaga ayaa saameyn ku leh go'aanka dugsi ee ku saabsan meelaynta iyo adeegyada. Sidaa daraadeed, waa mid aad muhiim u ah in dhammaan xubnaha kooxdu ay si sax ah u fahmaan xirfadaha ilmahaaga.

Haddii aad oggolaato go'aanka xirfadeed ee dugsi, waxaad si fudud ugu kalsoonaan kartaa warbixinta dugsi iyo talooyinka si loo go'aamiyo adeegyada ay tahay in la siiyo ilmahaaga. Haddii ay jirto isfaham la'aan idin ka dhaxeeyso adiga iyo dugsi waa inaad codsataa waraaqaha dabeecadda ama xirfadaha uu dugsi sheegayo iyo inaad guriga ku arag. Waxaad sidoo kale codsan kartaa qiimeeye madax-banaan si uu u indha-indheeyo dabeecada ama xirfadda su'aasha ka taagan tahay.

Sidoo kale, qiimeynta madax-bannaan ee

### TALO GORGORTAN

Haddii aad u baahan tahay khabiir ku caawiya, isku day in aad dooratid qof kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) taqaano oo ay ixtiraamto.

### TALO GORGORTAN

Haddii aadan waafaqsaneyn aragtida dugsi ka qabo ilmahaaga, weydiiso waraaqo ama qiimeyn madaxbannaan.

waxbarashada (IEE) waxay noqon noqon karta mid waxtar leh haddii aad u malayso in heerka xirfadeed ee ilmahaaga uu ka duwan yahay waxa dugsiga lagu arkay. Waa inaad sidoo kale siisaa dugsiga kambiyoonaasha shaqada ama waraaqaha kale ee xirfadeed si aad u taageerto mawqifkaaga. Waraaqahani waa muhiim haddii kooxdu rajaynayso inay ku guuleysato samaynta barnaamij ku habboon ilmahaaga. Waxa kale oo ay muhiim u tahay fahamka guud ee loo dhan yahay ee ilmahaaga ka qabaan xubnaha kooxda.

## Waayo-aragnimada

Waayo-aragnimadu waxay noqon kartaa mindi laba af leh. Inta badan, waxaa la aaminsan yahay inta ay badan yihiin sanadaha khibradeed ee qofku leeyahay, in ay tayada bixinta adeegga sareeyso. Tani waa run inta badan; si kastaba ha noqotee, mar walba run ma ahan. Macallimiin ama barayaal badan oo leh sanado khibradeed badan ayaa ah ka qaybgalayaal xiisaynaya geedi-socodka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) iyo fasalka, halka kuwa aysan xiiseynayn geedi-socodka waxbarashada. Waalidiinta, sidoo kale, waxay noqon karaan kuwo ka daalan oo aan ka niyadjabsan geedi-socodka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP).

Waxaa jira xubnaha kooxda oo leh khibrad yar oo toos ah oo xiiso iyo fikrado cusub u keena geedi-socodka. Tababaradooda ama soo dhaweynta farsamooyinka cusub ayaa laga yaabaa inay beddesho waayo-aragnimo la'aantooda ama muddada dheer.

Waa in lagu amaanaa xubnaha kooxda wixii ay dhab ahaan la yimaadaan geedi-socodka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP). Fikradda shakhsiyaadka leh soddonsano oo waayo-aragnimo ah waa inaysan mar walba ka cuslaan fikradaha qofka ku cusub hawsha. Kooxaha ugu fiican waxay leeyihiin heerar waayo-aragnimo oo iskudhaf ah iyo ixtiraamka dhammaan waxa lagu biiriyo.

## Taageerada iyo Dhigaalada

Dhammaan kooxaha waxay ubaahan yihiin dhigaalo iyo taageero si carruurta loogu waxbaro si wax ku ool ah. Carruurta iyo xubnaha kooxda labaduba waxay u baahan doonaan taageero. Tani waxay si gaar ah muhiim u tahay marka kooxdu isku deyeeyso inay fuliso wax cusub. Caadiyan, kooxaha Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) waxay xoogga saaraan go'aaminta adeegyada iyo taageeradda lagama maarmaanka u ah inay u adeegaan ilmaha. Sidoo kale waa lagama maarmaan in la taageero xubnaha kooxda ee u adeegaya ilmaha, tus. taageerada tababarka macallinka iyo taageerada tiknoolajiyada. Waa inaad waydiiso in dugsigu siiyo adeegyada iyo taageerooyinka muhiimka ah ee ilmahaaga iyo kooxda.

Way kugu adkaan kartaa inaad soo jeediso ama aad weydiisato taageero gaar ah oo loogu talagalay baraha iyada oo aadan wax khatar gelineyn barahaas. Macallimiinta ama xubnaha kooxda qaarkood ayaa dareemi kara inaad waxoogaa soo jeedinayso in baruhu uusan laheyn waayo-aragnimo ama awood si waxtar leh uu kula shaqeeyo ilmahaaga. Cabsida ah in loo arko xirfad la'aan iyo furfurnaanta bey'adda ee dugsiga si loogu oggolaado shaqaalaha inay tijaabiyaan fikradaha cusub ayna khaladaad sameeyaan, waxay saameyn ku yeelataa awoodda bataha uu ku qaabili lahaa codsigaaga ujeeddada aad u soo dirtay.

Ka digtoonow xiisadan oo noqo diblomaasi iyo mid dareensan sida loogu codsado taageero kooxda ama xubin gaar ah. Ugu horreyn, codsigaa noocan ah waxaa laga yaabaa in si haboon loogu diro maamulaha waxbarashada gaarka ah oo goob ka baxsan kulanka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP). Waxaa muhiim ah in la aqoonsado in macallimiinta iyo barayaasha kale ay rabaan inay guuleystaan ayna ku faraxsanaadaan waxa ay qabtaan.

Rabitaan la'aanta hore ee u adeegidda ilmahaaga waxay ku saleysnaan kartaa cabsi iyo faham la'aan iyo taageero la'aan. Waa inaad aqoonsato asalka iska caabinta si loo go'aamiyo habka ugu fiican ee taageerada.

Mararka qaarkood, adiga iyo dugsiga iskuma raaci kartaan arrin ka dhalata qiyamka asaasiga ah. Mid ka mid ah tusaalahan ayaa ah marka waalidku aaminsan yahay in lagu daro ilmaha fasalka waxbarashada caadiga ah inay tahay kaliya meeleeeynta ku haboon ilmaha. Dugsiga iyo bulshada waxay aaminsan yihiin in carruurta naafada ah in sida ugu fiican loogu adeego goobo gaar ah oo leh shaqaale iyo adeegyo khaas ah. Labada dhinacba run ahaantii waxay aaminsan yihiin inay sax yihiin. Arrimaha way adag tahay in la xalliyo marka qiyamka aasaasiga halis ku jiro. Waalidiintu waxay u baahan yihiin inay si fiican uga fiirsadaan istraatijiyadooda iyofursada bannaan xaaladaha noocaas ah iyo awoodda taageerada mawqifkooda. Inta badan, way adagtahay in la beddelo ama la saameyo aragtida qofka ee ku saabsan arrimahan.

## **GARO MARKA TALLAABO RASMI AH OO DHEERAAD AH LOO BAAHAN YAHAY KA BAARAANDEG FURSADHAAGA**

Haddii aanad awoodin inaad la xalliso dhibaatooyinkaaga dugsiga ee ku jira geedisocodka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP), oo aad doonayso inaad sii wado arintaas, waxaa jira dariiqooyin dheeraad ah oo lagu xallin karo khilaafaadka oo aad heli karto. Waxaa jira saddex talaabo oo aad heli karto sida uu qabo sharciga waxbarashada gaarka ah: shirarka kiiska, dib-u-eegis maamuleed iyo dhexdhexaadinta. Hababkan xallinta waa kuwo ikhtiyaar u yihiin waalidiinta iyo dugsiga labadaba mana aha in la sii wado ka hor intaadan codsan dacwad maamuleed xuquuq dhowris ama gudbin cabasho.

Looma baahna inaad qareen ama u doodo u wadato mid ka mid ah hababkaas. Waxaa laga yaabaa inay fiican lahayd in kooxda xallin karto arrimaha iyadoo uusan qareen ka qaybgalayn. Si kastaba ha noqotee, xaaladaha qaarkood, qareennada guud ahaan way ku lug yeeshaan. Kuwan waxaa ka mid ah mararka codsiga xuquuq dhawrista la gudbiyay, marka khilaafku adag yahay ama u baahan yahay kharashka maalgelin oo aad u weyn, iyo marka aad weydiisanaysid dugsiga adeega uusan horey u bixin jirin.

Ihaddii dugsigu u soo wato qareen marxalad kasta oo geedi-socodka ka mid ah, waa inaad haysataa mid sidoo kale, haddii ay suurtagal tahay. Si aad si wax ku ool ah uga gudubto geedi-socodka xallinta khilaafaadka, qareenkaaga waa inuu leeyahay faham guud oo ku saabsan sharciga waxbarashada gaarka ah. Waaxda Waxbarashada ee Ohio iyo Shirkada Xuquuqda Naafada Ohio waxay haysaa taxaalka qareennada kmuujiyay inay rabaan inay ku matalaan waalidiinta arrimaha waxbarashada gaarka ah.

### **Shirka Kiiska**

Shirka kiiska caadi ahaan waa kulan aan rasmi ahayn kaasoo adiga iyo dugsiga dib ugu eegeysaan qiimeeynta, ama meeleynta Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) oo aad isugu dayaysaan inaad xallisaan dhibaatooyinka. Shirka kiiska waxaa loo codsan karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan wakhti kasta, waana in qoraal kooban oo natiijooyinka shirka ku saabsan in la geliyaa faylka ilmahaaga.



## Dib-u-eegista Maamuleed

You may also request an administrative review with the superintendent or his or her designee to discuss your concerns and how to resolve problems with your child's education. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa dib-u-eegid maamuleed kormeeraha guud ama wakiilkiisa amawakiilkeeda si aad ugala hadasho cabashadaada iyo sida loo xalliyo dhibaatooyinka waxbarashada ilmahaaga. Sida dib-u-eegista loo fuliyo guud ahaan waxaa go'aamiya dugsiga. Labada xaaladood midkood, kormeeraha guud waa inuu jawaab-celin kugu siiyaa qoraal ahaan labaatan cisho gudahood marka la sameeyo dib-u-eegista.

Waaxda Waxbarashada Ohio waxay dhiirrigelisaa xallinta arrimaha inta lagu jiro dib-u-eegista. Dib-u-eegista maamuleed ayaa noqon karta mid waxtar leh marka kormeeruhu uusan ka mid ahayn kooxdii hore, oo marka loo sheego xaaladda, uu doorto inuu xalliyo khilaafka. Waxay sidoo kale waxtar noqon kartaa marka wakiilka dugsiga ee kulanka Barnaamijka Waxbarashada Gaar ahaaneed (IEP) uusan dooneyn inuu go'aan kama dambeys ah ka gaaro arrinta.

## Waaxda Dhexdhexaadinta Waxbarashada ee Ohio

Waxaad waydiisan kartaa Waaxda Waxbarashada dhexdhexaadinta cabashadaada. Dhexdhexaadinta waxaa la codsan karaa ka hor ama ka dib codsashada dacwad maamuleed xuquuq dhowris ama gudbinta cabashada. Dhexdhexaadinta waa ikhtiyaari. Adiga iyo dugsiga labadiinaba waa inaad oggolaataan dhexdhexaadinta si horay loogu socdo. Mararka qaarkood dhexdhexaadintu way waxtar badan tahay haddii lala codsado iyadoo lala kaashanayo dacwad maamuleed xuquuq dhowris ama gudbinta cabasho. Dugsiyadu waxay u qaadan karaan dhexdhexaadinta si dhab ah marka xallinta arrin xuquuq dhawris la sugayo ama cabashadu ay halis ku jirto.

Haddii dhexdhexaadinta ay ku lug leedahay arrin dhinacyadu aad ugu kala duwan yihiin, dhexdhexaadinta oo dhan waxaa laga yaabaa in la fuliyo iyadoo dhinacyadu isla joogin. Marka ay dhexdhexaadintu ku lug leedahay arrin laga yaabo in la xalliyo, ama marka dhinacyadu ay horumar dhaqso ah ka sameynayaan xallinta, waxaa laga yaabaa inay waxtar leedahay in waalidiinta iyo dugsiga la isku keeno marxaladaha qaarkood inta lagu jiro geedi-socodka. Waa inaad ka wada xaajootaan isku keenida dhinacyada iyo dhexdhexaadiyaha haddii aad u maleyneyso in ay waxyar u leedahay xallinta khilaafka.

Haddii heshiis lagu gaaro dhexdhexaadinta, waa in la qoraa heshiis dhexdhexaadinta ah oo ay saxiixaan dugsiga iyo waalidka. Shuruudaha heshiiska waxaa go'aamiya dugsiga iyo waalidka. Dhammaan dhinacyada dhexdhexaadinta waa in ay helaan nuqulka heshiiska. Heshiiskani wuxu noqonayaa qayb ka mid ah diiwaanka waxbarashada ilmahaaga waana qarsoodi.

Guud ahaan, haddii dhexdhexaadintu ay guulaysato oo ay jirtay codsi dacwad maamuleed xuquuq dhowris ama cabasho loo gudbiyay Waaxda Waxbarashada Ohio, dugsiga ama waalidka waxay codsan doonaan ka-noqoshada codsiga cabashada ama dacwad dhageysiga. Inta badan, looma sii loo baahano dacwad dhageysiga ama cabashada waayo heshiiska dhexdhexaadinta ayaa xalliyay arrimaha oo dhan. Xaaladahan qaarkood, waxaa laga yaabaa in la aqbali karo in laga noqdo codsiga cabashada ama dacwad dhageysiga. Xaaladaha qaarkood, heshiiska dhexdhexaadinta ayaa kaliya xallin kara arrimaha qaarkood. Xaaladaha qaarkood, waxaa habboon in laga noqdo cabashada ama codsashada dacwad dhageysiga. Dhammaan xaaladaha, haddii qareen kaaga yahay wakiil dacwad dhageysiga, cabashada ama dhexdhexaadinta, waa inaad la tashataa qareenkaaga ka hor intaadan ka noqon codsiga dacwad dhageysiga ama cabashada.


Waxaa muhiim ah inaad sii wado joogteynta gorgortankaaga aad inta lagu guda jiro geedi-socodka. Ma habboona inaad kordhiso dalabaadkaaga marka geedi-socodka horay u sii socdo. Si aad uga fogaato dhibaatan, hubso inaad si cad u qeexday waxa aad

u rabto ilmahaaga marka uu bilaabanayo geedi-socodka gorgortanka. Xasuusnow in gorgortanku ku lug leeyahay tanaasul iyo inaadan had iyo jeer helin wax kasta oo aad rabto adigoo isticmaalaya geedi-socodkan. Sidaa daraadeed, waxaa laga yaabaa inaad doonayso inaad mudnaanta siiso waxyaabaha aad u rabto ilmahaaga oo aad go'aan ka qaadatid arrimaha aad rabto inaad tanaasul ka sameeyso.

Maskax furfurnow inta lagu jiro dhexdhexaadinta oo diiradda saar mustaqbalka. Diirad saarida khaladaadkii hore dugsiga wuxuu hor joogsanayaa awooda aad go'aan ku gaari lahayd gudaha dhexdhexaadinta. Shaqaalaha dugsiga ee jooga dhexdhexaadintu ma aha inay noqdaan shaqsiyaadka la shaqeeya ilmahaaga haddii qaladaad hore ay dhaceen. Wadahadal badan oo laga yeesho wax horay u dhacay ayaa sidoo kale ka xanaajin kara oo ka caraysiin kara shaqaalaha dugsiga waxayna ka niyad-jebin kartaa jawi iskaashi. Joogitaanka dhexdhexaadintu waxay calaamad u tahay rabitaanka ka qaybgalaha inuu illoobo wixii tagay oo horay loo dhaqaaqa si loogu adeego ilmaha sida ugu habboon. Dhexdhexaadintu waa iskaashi halkii ay ka ahaan lahayd hab tartan oo lagu xallin karo khilaafaadka. Sidaa awgeed, dhexdhexaadintu waxay ku dhiirigelisaa waalidiinta iyo iskuulada in ay wadashaqeeyaan si ay u xalliyaan dhibaatooyinka ay wadaagaan.

## SHANTA MARXALADOOD EE DHEXDHEXAADINTA

Marxalad	Hawl Dhexdhexaadin
<b>Horudhac</b>	Isbarashada kaqaybgalayaasha iyo guudmarka ee geedi-socodka dhexdhexaadinta. Tani waxaa sameeya dhexdhexaadiyaha.
<b>Soo bandhigida</b>	Waalidiinta iyo dugsiga waxay sheegi doonaan sheekadooda waxayna sharrixi doonaan waxa ay la rabaan ilmaha.
<b>Gorgortanka</b>	Waalidiinta iyo dugsiga waxay geli karaan qolol kala gaar ah. Inta badan qofka codsaday dhexdhexaadinta ayaa ah inuu soo jeediyo xalka khilaafka qaab soo-jeedin oo uu la wadaagayo dhinaca kale dhexdhexaadiyaha. Dhexdhexaadiyuhu ayaa horay iyo gadaal ugu laaban kara dhinacyada ilaa inta heshiis laga gaaro ama dhinacyadu ku heshiinayaan in khilaafka lagu xallin karin dhexdhexaadinta.
<b>Heshiiska</b>	Haddii heshiis la gaaro, dhinacyadu waxay sameeyaan heshiis qoraal ah oo qeexaya waxa ay dhinacyada go'aansadeen in lagu xallin karo khilaafka.
<b>Xiritaanka</b>	Heshiiska waa la saxiixa waxaana nuqulo la siiyaa kaqaybgalayaasha. Bayaanka xiritaanka ayuu guud ahaan sameeya dhexdhexaadiyaha isagoo uga mahadcelinaya dhinacyada kaqaybgalkooda iyo dadaalka ay sameeyeen iyagoo metelaya ilmaha.



We have the legal right of way.

**Disability Rights Ohio**  
200 Civic Center Dr., Suite 300  
Columbus, Ohio 43215-4234

614-466-7264 or 800-282-9181  
**FAX** 614-644-1888

[disabilityrightsohio.org](http://disabilityrightsohio.org)